## 2025-2026 CODSIGA BARNAAMIJKA TAMARTA EE MINNESOTA

Codsiga barnaamijka Tamarta ee Minnesota waxa lagu helayaa luuqadaha Hmong, Soomaali, Isbaanish, Fiitnaamiis, ama qoraal daabacan oo weyn oo laga helayo Adeeg Bixiyaahaaga ama dhanka khadka oo laga helayo mn.gov/home

**Codsigan waxa loo adeegsadaa in lagu codsado barnaamijyadan:**

- Barnaamijka Taageerada Tamarta (EAP)
- Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP)
- Barmaajika Kor-u-qaadista Tashiilka (CIP)

**Sida codsigan loo buuxiyo**

- Akhri dhammaan macluumaadka codsigan la socda.
- Ku buuxi macluumaadka qof kasgta oo gurigaaga ku nool. DHAMMAAN dadka ku nool gurigu waa xubnaha qoyska haddii ay dadkaasi wadaagaan kijada ama qaybaha kale guriga lagaga nool yahay.
- Dhammeystir oo u keen Adeeg Bixiyahaaga codsiga, caddeynta dakhliga iyo dukumeentiyada kale.
- Waa inaan heynaa dukumeentiyada oo dhameystiran si aan u go'aamino inaad u qalanto barnaamijka iyo in kale.

Haddii aad u baahato in buuxinta codsiga lagaa caawiyo, wac Adeeg Bixiyahaaga Maxalliga ah ee EAP. Lambarka taleefankooda wuxuu ku qoran yahay bogga koowaad ee Codsiga Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota.

Si necesita ayuda para completar esta solicitud, comuníquese con su proveedor de servicio del PAE local. El número de teléfono se encuentra en la primera hoja de la solicitud de los Programas de Energía de Minnesota.

Haddii aad u baahato in buuxinta codsiga lagaa caawiyo, wac Adeeg Bixiyahaaga Maxalliga ah ee EAP. Lambarka taleefankooda wuxuu ku qoran yahay bogga koowaad ee Codsiga Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota.

Yog koj xav tau kev pab sau daim ntawv thov no, hu rau Tus Neeg Muab Kev Pab EAP hauv koj cheeb tsam. Lawv tus xov tooj yog teev rau ntawm thawj nplooj ntawv ntawm Daim Ntawv Thov Minnesota Cov Khoo Kas Pab Them Nqi Hluav Taws Xob.

Nếu quý vị cần hỗ trợ để điền vào đơn đăng ký này, hãy gọi cho Nhà Cung Cấp Dịch Vụ EAP tại địa phương của quý vị. Số điện thoại của các nhà cung cấp được liệt kê trên trang đầu tiên của Đơn Đăng Ký Chương Trình Năng Lượng Minnesota.

**Dir caddeynta dakhliga**

- Soo dir caddeynta dakhliga guud ee ay heleen dhammaan dadka qoyskaaga ee bil buuxa ee ka horeeya bisha aad saxeexayso codsiga. Dir nuqullo, dukumeentiyada asalka ah laguuma soo celin doono.
  **Hubaal la'aanta maalgelineed darteed, xadiga ugu badan ee dakhliga loo oggol yahay ee halkii cabir qoys ayaa laga yaabaa inuu hoos u dhaco. Ka hubi mn.gov/home tilmaamaha ugu dambeeyay ee dakhliga ee hadda jira.**

| Codsiga waxa saxeexay: | Dir caddeynta dakhliga guud ee la helay: |
|---|---|
| Agoosto 2025 | Luulyo 2025 |
| Sibteembar 2025 | Agoosto 2025 |
| Aktoobar 2025 | Sebt 2025 |
| Noofeembar 2025 | Okt 2025 |
| Diiseembar 2025 | Nof 2025 |
| Jannaayo 2026 | Dis 2025 |
| Febraayo 2026 | Jan 2026 |
| Maarso 2026 | Feb 2026 |
| Abril 2026 | Maarso 2026 |
| Maayo 2026 | Abril 2026 |

| Dakhliga qoyska kama badnaan karto hagayaashan dakhliga ee 1-ka bil: | |
|---|---|
| **Cabbirka Qoyska** | **Dakhliga** |
| **1** | $3,119 |
| **2** | $4,079 |
| **3** | $5,039 |
| **4** | $5,999 |
| **5** | $6,959 |
| **6** | $7,919 |
| **7** | $8,099 |
| **8** | $8,279 |
| **9** | $8,459 |

**Caddeymaha la dirayo**

- **Mushahar:** EAP waxay SSN-kaaga (lambarkaaga amniga bulshada) u isticmaali kartaa inay ku xaqiijiso mushaharka ay soo gudbiyeen cidda aad u shaqeyso. Haddii aan caddayn buuxda la bixin, macluumaadka waxaa laga soo hubiyaa Waaxda Department of Employment and Economic Development (DEED), taas oo noqon karta mid jirta ilaa 6 bilood. Waxaa laga yaabaa inaanu kaa codsano inaad bixiso warqadaha jeegga ama xaqiijin kale haddii aanan awoodin inaanu mushaharkaaga ka xaqiijino DEED. Haddii dakhligaagu hoos u dhacay 6-dii bilood ee la soo dhaafay, waxaad u baahan doontaa inaad bixiso caddeynta bishii ugu dambeysay ee kaalandar buuxa ee mushaharkaaga laga bilaabo bisha ka hoeysar inta aanad saxiixin codsigaaga, ama waxaa la isticmaali doonaa macluumaadka ay soo sheegtey DEED.
- **MFIP, GA, DWP:** Waraaq gobol oo muujinaysa xaddiga billaha ah ama waraaqda dhaqdhaqaaqa bangiga.
- **Taageero lammaane ama lacagta masruufka kala tagga ka dib:** Nuqulo jeeg, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga, , amarka furiinka (bogga koobaad iyo ka ka dambeeya oo ay la socoto bogagga la xiriira masruufka), ama qoraal uu soo saxeexay bixiyuhu oo ay ku caddahay xaddiga lacagaha la baxshay iyo taariikhdu, ama caddeyn kale oo sheegaysa xaddiga lacagta la helay.
- **Gunnooyinka Halyeyada, Amniga Bulshada, RSDI iyo SSI:** Waraaqaha lagu baxshay, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga oo muujinaya dhigaalka, ama nuqulo jeeg.
- **Mag-dhow shaqaale, Naafonimo Muddo Ggaaban ama Muddo Dheer:** Ogeysiiska gunno siinta, nuqulada jeegaga mag-dhowga ama naafonimada shaqaalaha, xogta magdhowga ee shaqaalaha, ama xogta qareenka.

- **Cayrta Shaqo-la'aanta:** Waxa laga yaabaa inay EAP dakhligan ku xaqiijiso. Haddii aanu awoodi wayno inaanu xaqiijin waxaanu kaaga baahnaan doonaa cadeymo.
- **Isu-shaqeeya, Beer Leh, ama Dakhli Kiro:** IRS-1040 oo ay la socoto saxeexaaga iyo Jadwalka 1-aad. Haddii aadan soo gudbin cashuurtaada, wac Adeeg Bixiyahaaga oo ka dalbo Foomka Isu-shaqeynta.
- **Dulsaarka, Faa'iido-Qaybsi:** Waraaqaha Dhaqdhaqaaqa Bangiga, IRS1099, ama IRS-1040.
- **Dakhliga Hawlgabka oo uu ku jiro Dakhliga IRA:** Jeegaga/waaraqaha gunnada, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga ama waraaqda bixinta.
- **Lacagaha hawlgabka iyo Maalgashiga dadka waaweyn:** Jeegaga/waaraqaha gunnada, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga ama waraaqda bixinta.
- **Dakhliga Qabiilku qofka siiyo, bakhshiiska, ama Lacagaha Xukunka:** Jeegaga/waaraqaha gunnada, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga ama waraaqda bixinta.
- **Bilaa Dakhli:** Haddii qoyskaaga aanay soo gelin wax dakhli ah ama qofna aanu idiin shaqeyn, wac Adeeg Bixiyahaaga.

****Fadlan soo dir nuqulada cadeynta dakhligaaga. Dukumeentiyada asalka ah lama celin doono****

---

**Maxaa dhacaya marka xiga?**

- Adeeg Bixiyahaaaga Maxalliga ah ayaa dib u eegi doona codsigaaga oo kula soo xiriiri doona haddii ay u baahdaan macluumaad dheeraad ah.
- Haddii ay hayaan dhammaan macluumaadkii muhiimka ahaa, Adeeg Bixiyahaaga Maxalliga ahi wuxu codsigaaga uga hawlgeli doona sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah, oo waxaad heli doontaa waraaq kuu sheegaysa inaad kaalmo heli karto.
- Haddii la ansxiyo, waxaanu gunnadaada siin doonaa shirkadaha aad ku soo qortay codsigaaga.
- Haddii la diido, waxaanu kuu sheegi doonaa sababta iyo sida aad dib ugu soo codsan karto ama go'aanka rafcaan uga qaadan karto.

---

**Taageerada tamarta ee degdega ah**

Barnaamijka Taageerada Tamartu waxa laga yaabaa inuu ku kaalmeeyo haddii aad xaalad degdeg ah oo tamareed qabto. La Xiriir Adeeg Bixiyahaaga haddii:

- Kuleylkii ama korontada lagaa jaray ama lagaa jari doono
- Aad awoodi kari wayday in shidaalka laguu keeno
- Aad guriga adigu leedahay oo foornada dabku aanay kuu shaqeynayn

---

**Lambarada Amniga Bulshada (SSNs)**

SSNs waxa laga rabaa dhammaan codsadayaasha marka laga reebo dadka ajaanibka ah ee u qalma ee codsanaya barnaamijka (tusaale, dadka degenaashaha joogtada ah haysta, magan-galyo doonka, qaxoontiga, iwm.). Haddii aadan bixin lambaro amni bulsho ama waraaqo socdaal oo sax ah, kama shaqeyn karno codsigaaga. Haddii aad tahay qof ajaanib ah oo u qalma barnaamijka, waxa laga yaabaa inaad SSN la'aan ku codsato. La xiriir Adeeg Bixiyahaaga si aad u ogaato dukumeentiyada la rabo. Haddii adiga ama xubnaha qoyskaagu yihiin ajaanib aan barnaamijka u qalmin, waxa laga yaabaa in qoyskaagu weli heli karo kaalmada haddii xubnaha qoyska midkood yahay muwaadin ama ajaanib barnaamijka u qalma. La Xiriir Adeeg Bixiyahaaga wixii tafaasiil ah. Gobolku wuxu SSN-yada u adeegsan doona maamulista EAP si loo hubiyo aqoonsiga, looga hortago laba-jeer ka qaybqaadashada, oo loo go'aamiyo u qalmista gunnooyinka dadwaynaha. SSN-kaaga waxa sidoo kale loo adeegsan doonaa in macluumaadka mushaharka iyo mag-dhowga lagaga helo Waaxda Shaqaaleynta iyo Koboca Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED), lagu xaqiijiyo macluumaadka aad codsiga ku dhex bixisay, oo lagaga hortago, lagu ogaado, laguna saxo been-abuurka, khasaareynta, iyo si xun u isticmaalka.

---

**Codsadayaasha ajaanibka ah**

Si aad kaalmo uga hesho Barnaamijka Tamarta ee Minnesota, waa inaad ahaataa muwaadin ama si sharci ah ku joogta Waddanka Maraykanka (US). **Gunnooyinka Kaalmada tamarta lama tiriyo marka la go'aaminayo faa'iidoyinka dadka ajaanibta ah.** Waxaad kaalmo u codsan kartaa oo u heli kartaa xubnaha qoyska ee u qalma barnaamijka, xitaa hadii adiga ama xubnaha qoyska qaarkood aanay u qalmin xaaladdooda socdaal darteed. Xubnaha qoyskaaga ee ah ajaanib u qalma barnaamijku waa inay keenaan caddeynta xaalkooda socdaal. Bixi nuqulada labada dhinac ee kaararka socdaalka ama dukumeentiyada kale ee sheegaya xaalkooda socdaal ee xubin kasta oo qoyska ka mid ah oo ajaanib u qalma barnaamijka ah. Dhammaan xubnaha qoyska iyaga oo aan loo eegayn xaalkood socdaal ama muwaadinimo, waa inay baxshaan macluumaadkooda dakhli, balse keliya muwaadiniinta ama ajaanibka barnaamijka u qalma ayaa xubno qoys ahaan loo tirin doonaa. La xiriir Adeeg Bixiyahaaga si aad u ogaato waxa xaaladdaada laga rabo. **Ogolaanshahaaga la'aantiis, macluumaadka kugu saabsan lama wadaagi doono Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha ee Maraykanka (USCIS).**

---

**Habraacyada Dakhliga U Qalmista Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP)**

Waxa laga yaabaa inaad u qalanto Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP) xitaa haddii dakhliga qoyskaagu u ka sarreeyo xadka EAP. WAP waxay mulkiilayaasha iyo kireystayaasha u qalma siisaa cusbooneysiin dhanka tamarta guryaha ah taas oo ka caawisa marxinta tamarta kana dhigta gurigaaga mid caafimaad qaba oo aamin ku ah in lagu noolaado. Wixii macluumaad dheeraada ah, booqo https://mn.gov/commerce/consumers/consumer-assistance/weatherization ama wac **1-800-657-3710**

---

**Sharciga Iska Ilaalinta Cimilada Qaboow**

Haddii aad isticmaasho gaasta dabiiciga ah ama koronto si aad guriga ugu kulayliso ama aad u baahan tahay koronto aad kaga shaqeysiiso kuleyliyahaaga ama marawaxadda foornadaada kuleylinta, waxaad xaq u yeelan kartaa Sharciga Iska Ilaalinta Cimilada Qaboow inta u dhexaysa Oktoobar 1 iyo Abriil 30.

- Sharciga Cimilada Qaboow wuxu kaa caawinayaa inaad iska ilaaliso in adeegga lagaa jaro ama wuxu kaa caawinayaa in aad adeega dib u soo xirato.

- **Si aad u hesho iska Ilaalinta Cimilada Qaboow, waa INAAD la xiriirtaa shirkadaha ku siiya tamarta oo la sameysataa qorshe lacagbixineed kuna taagnaataa. Haddii aad seegto lacagbixin, waad waayaysaa ilaalintaada waxaadna waayi kartaa adeega kuleylinta.**
- Haddii aad hesho Taageero Tamareed, waxaad horey ugu sii qalmeysaa Sharciga Iska Ilaalinta Cimilada Qaboow. Barnaamijka Kaalmada Tamartu maaha qorshe lacag bixineed mana beddelayo lacagtii aad u baahan tahay inaad bixiso.
- Adeeg Bixiyaahaga ayaa kaa caawin kara inaad qorshe lacagbixineed macquul ah la sameysato shirkadaha tamarta.

Tri-County Action Program, Inc.
1210 23RD AVE S
PO BOX683
WAITE PARK, MN 56387
(320) 251-1612 FAX #: 320-654-9473
EMAIL: EAP@TRICAP.ORG

| **Xafiiska ayaa isticmaalaya oo keliya** |
|---|
| **HH:** |
| Tixraac ☐ |
| Rep#: |
| Xaddiga deeqda: |

Bedelkeeda Ka codso khadka tooska ah

**mn.gov/home**

**Fadlan isticmaal khad madoow si aad ugu buuxiso codsigaaga. Dukumeentiyada aad dirayso ha u isticmaalin calaamadeeyayaal.**

# CODSIGA BARNAAMIJKA TAMARTA EE MINNESOTA 2025-2026

mn COMMERCE DEPARTMENT

*Ka hor intaadan buuxin codsigan, si taxaddar leh u akhri "Masuuliyadahaaga iyo Xuquuqdaada" ee ku lifaaqan iyo tilmaamaha.*

**Qaybta 1. Macluumaad Shaqsiyeed** - **Xaqiiji in dhammaan xogta codsigan horey ugu daabacnayd ay saxan tahay. Isbedelada sida la rabo u samee.**

| **Lambarkaaga Amniga Bulshada (SSN)** | • Lambarada Amniga Bulshada (SSNs) ayaa laga rabaa dhammaan xubnaha qoysika waana la hubin doonaa<br>• Haddii aan SSN ansaxa lahayn, dukumeenti nooc kale ah ayaa la rabaa<br>• Haddii xubnaha qoyska midkood yahay ajaanib aan barnaamijka u qalmin, waxa laga yaabaa in qoyskaagu weli heli karo kaalmada haddii 1 ka mid ah xubnaha qoyska yahay muwaadin ama ajaanib barnaamijka u qalma.<br>• SSN-kaaga waxaanu u isticmaali doonaa si aanu u helno macluumaadka cayrta shaqo-la'aanta |
|---|---|

**Magaca Sharciga ah:** BB– MM– SSSS

Magaca Koobaad | M.I. | Magaca Dambe | Taariikhda Dhalashada

**Cinwaanka Meesha Aad Hadda Ku Nooshahay**

Lambarka Guriga iyo Dariiqa | Apt #

Magaalo | Gobolka: MN | Zip Code | Maamul

**Cinwaanka Boostada (hadduu ka duwan yahay halkaad ku nooshahay)**

Dariiqa ama Sanduuqa Boosta

Magaalo | Zip Code | Maamul

**Luuqadda Aad ku Hadasho:**

**Taleefanka Koobaad:** (        )
☐ Taleefanka gacanta

**Taleefan Kale:** (        )
☐ taleefanka gacanta

**Iimayl Ciwaanka:**

**Si la iigula soo xiriiro Qoraal, waxaan door bidayaa: (Dooro mid qura)**
○ Boostada Maraykanka (Waraaq) ○ iimayl

**Wakiil Idman:** Haddii aad buuxiso qaybtan, "Wakiil Idman" ayaa ogolaansho u haysta inuu ku metelo balse ma saxiixi karo codsiga illaa iyo isagoo sharciyan loogu idmo inuu sidaas yeelo maahane, (tusaale, Qareen uu Awood u Siiyo, Masuul ama Ilaaliye ah). Dukumeentiyada wakiilka soo raaci codsiga.
**Wakiilka la oggolaaday waa inuu ahaadaa shakhsi kaliya oo aanay noqon koox ama urur.**

Magaca koobaad ______ Magaca dambe ______ Taleefan (____) ______

Waxaan rabaa in **Wakiil Idmani** waraaqdeyda boosta helo isagoo i metelaya ☐ (haddii aad saxdo, cinwaankiisa halkan hoos geli.)

Dariiqa ama Sanduuqa Boostada ______ Apt # ______ Magaalo ______ Gobol ______ Zip Code ______

**WAA INAAD CODSIGAN KU SAXIIXDAA OO KU TAARIIKHAYSAA GUNTA HOOSE EE BOGGA**

## Qaybta 2. Macluumaadka qoyska

Liistee dhammaan xubnaha qoyska, adiga oo adigu isku bilaabaya (waalidiinta caruurta dhalay ee aan haysan waxay ku dari karaan caruurtooda yaryar):

LOO BAAHAN (Lambarka Amniga Bulshada – Taariikhda Dhalashada) · 6-DII BILOOD EE U DAMBEYSAY (Dakhli/Gunooyin – Tirada shaqaalaha)

| Lambarka Amniga Bulshada<br>Tus: 555-55-5555<br>Ku xaqiiji hoos haddii aanad lahayn lambarka soshyaal sekiyuuriti (SSN). Arag tilmaamaha wixii macluumaad dheeraad ah. | Magaca Sharciga<br>Magaca Hore M.I. Dambe<br>Tus: Pat T. Smith | Taariikhda Dhalashada<br>bb-mm-ssss | Dakhli/Gunooyin<br>Y/N | Tirada shaqaalaha | Taariikhda ugu dambeysay ee Shaqaaleysiinta<br>BB – MM - SSSS | Jinsiga Ku qor<br>Tus: Lab | Sinji<br>Eeg Hoose | Hisbaanik Latino/a/x<br>Y/N | Naafo ah<br>Y/N | Halyey<br>Y/N |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| (Aniga) | | - - | | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | | |
| | | - - | | | | | | | | |

**Ku soo lifaaq waraaq dheeraad ah haddii loo baahdo si aad ugu qorto xubnaha qoyska ee dheeraadka ah.**

| **Sinji:** | **A =** Eeshiyan **B** = Madow ama Afrikaan Maraykan **I** =Hindi Mareykan ama Dhaladka Alaska<br>**P** = Dhaladka Huwaay ama Aylaanderada Baasifiga ee Kale **W** = Caddaan **M** = Jinsiyo Badan **O** = Kale |
|---|---|

- Miyaa xubnaha qoyskaaga mid ka mid ah dakhligiisu yaraaday 6-di bilood ee ugu dambeysay? Kuma……………………
  *Qof walba oo qoyskaaga ka tirsan, soo dir dakhliga bisha oo dhammaystirsan. Eeg tilmaamaha wixii macluumaad dheeraad ah.*
- Miyay jiraan xubno ka weyn +18 oo aan dakhli lahayn? Xubnahee? Fadlan sababee……………………
- Ma doonaysaa inaad is diiwaangeliso si aad u codayso ama inaad beddesho diiwaangelintaada haddii aad guurtay? ○ Haa ○ Maya
- Miyuu qof qoyskaaga ka mida hadda yahay shaqaale ka shaqeeya ama xubin boor ka ah haayadda taageerada tamarta? ○ Haa ○ Maya
- **Sidee baad ku maqashay barnaamijka Taageerada Tamarta?** ○ Asxaabta/Qoyska ○ Codsade Hore ○ Jaraa'id ○ Tabeelle ○ Baraha Bulshada/Xayaysiin Dhijitaal ah ○ Raadiye ○ Kireeye ○ Shaqaalaha Maamulka ○ Xafiiska Halyeyada ○ Websaydka Gobolka ama Maamulka ○ Shidaal/Adeeg Keene ○ Kale______.

## Dakhli, Gunnooyin, iyo kaalmooyinka kale: (Eeg tilmaamaha wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dakhliga ama noocyada dheefaha.)

- Calaamadee dhammaan noocyada dakhliga qoyskaagu leeyahay oo qor dadka hela nooc kasta oo dakhli ama dheef ah.
- Soo dir caddeynta dakhli ee loo baahan yahay laga bilaabo bisha ugu dambeysa ee kaalandar buuxa laga bilaabo taariikhda saxiixa codsiga. Caddeyn dheeraad ah ayaa lagu weydiin karaa.

**Dakhliga** — Kumaa leh dakhligan

☐ Mushaharo - Haddii aan caddeyn la bixin, waxaanu isticmaali doonaa xogta mushaharka DEED (haddii la heli karo) si loo xisaabiyo dakhligaaga bilaha. Xogta DEED waxay noqon kartaa mid jirta ilaa 6 bilood. ________

☐ Isu-shaqayn*/Dakhliga Beerta/Qandaraas/Shaqo madax banaan/Mushqaayad ________
Sannadka iyo bisha la bilaabay: ______-______
*Soo dir 2-da bog ee u horreeya iyo Jadwalka 1. ee cashuur celiskaaga u dambeeyay ee IRS-1040.*

☐ *Ma jiro dakhli: Fadlan naga soo wac*

Kumaa leh dakhligan

☐ Cayrta Shaqo-la'aanta ________
(Lala xaqiijiyay DEED. Haddii aan la heli karin, caddeyn ayaa loo baahan yahay)

☐ Dakhliga Dulsaarka ama Faa'iido Qaybsiga ________

☐ Dakhli Kiroole ________

☐ Magdhowga Shaqaalaha ________

☐ Qandaraaska Maalgashiga Dulsaarka ________

☐ Kuwo kale ________

**Gunnooyin**

| | Kumaa leh dheeftan | | Kumaa leh dheeftan |
|---|---|---|---|
| ☐ Gunnooyinka Amniga Bulshada (SSDI, RSDI, SSA) | ________ | ☐ Gunnooyinka Halyeyada | ________ |
| ☐ Dakhliga Amniga ee Dheeraadka ah (SSI) | ________ | ☐ Lacagaha Qabiilka Qofku Siiyo | ________ |
| ☐ Bisilka/Lacagta Dadka Waaweyn (ay ku jiraan rubucle & sannadle) | ________ | ☐ Lacagaha Xukunada Qabiilka ama Bakhshiishka Qabiilka | ______ |
| ☐ Dakhliga Hawlgabka (oo uu ku jiro Dakhliga IRA, iwm.) | _______ | ☐ Naafonimada Muddada Dheer/Gaaban | ________ |
| ☐ Barnaamijka Maalgashiga Qoyska (MFIP ama TANF) | ________ | ☐ Taageerada Laamanaha ama Furriinka ka dib | ________ |
| ☐ Taageerada Guud (GA) – ***Gunnooyinka Naqadka* ah** | ________ | ☐ Shaqooyinka Leexsan (DWP) | ______ |

**Wax caddeyn dakhli ah looma baahna:**
☐Taageerada Ilmaha - ☐Lacagaha Billaha ah$_____________ ☐Taageerada Cuntada ☐Deynta Cashuurta Dakhliga la Kasbaday ☐Taageerada Dheeraadka ah ee Minnesota (MSA)

**Codsigaaga dib ayaa loo dhigayaa haddii aadan soo raacin dhammaan caddeymaha dakhliga ee la rabo.**

## Qaybta 3. Macluumaadka Guriyaynta

Waxaan ku nool nahay: ○ Guri ○ Abaarman/Koondo ○ Guri-dawladeed○ Guri Socda○ Duplex ○ Triplex ○ Fourplex ○ Kale________

Illaa intee ayaad ku noolayd gurigaaga hadda? ____________ Sannadood___________Bilood Immisa qof ayaa ku nool gurigaaga?…………

Waxaan bixiyaa: ☐ Kiro ☐ Deyn Guri ☐ Kirada booska ☐ Ma baxsho lacag bille ah. Haddii aad lacag bixiso, dakhliga billaha ah ee lagaa rabo waa imisa: $______________**baa la iga rabaa**

### Waxaan ahay kireyste:

Ma hesha kaabis kiro miyaadse ku nooshahay guri la kaabo? ○ Haa ○ Maya

Kharashka kuleylinta ama korantadu miyay ku jiraan kirada?

Sax kuwa ku habboon: ☐ Kuleylinta ☐ Koronto

**Macluumaadka Kireystaha**

Magac:______________________________________________

Taleefan (___________)____________________________

Dariiqa ama Sanduuqa Boosta._________________________Apt#_______

Magaalo__________________________ Gobol_______ Zip Code

### Waxaan leeyahay guri:

Miyaad leedahay ama aad gadan rabtaa gurigaaga? ○ Haa ○ Maya

Haddii nidaamkaaga foornada/ kuleyliyaha hadda aanu shaqeynin, isla markiiba wac Adeegbixiyahaaga oo sax sanduuqan: ☐.

**Kireystayaasha iyo Mulkiilayaasha guryaha:**

Haddii aad adigu isu-shaqeyso, ganacsiga ma gurigaaga ayaad ka waddaa? ○Haa ○Maya

Haddii ay **Haa** tahay, waa maxay nooca ganacsiga iyo shaqada aad ku qabato gurigaaga? ______________________________________________

Gurigaaga qayb ka mid ah miyaad cid kale ka kireysaa? ○ Haa ○ Maya

Taangigaaga shidaalka ama saacadda korontada miyaad cid kale la wadaagtaa? ○ Haa ○ Maya

## Qaybta 4. Tamar Bixiyayaasha

**Shirkadahee ayaa gurigaaga siiya korontada iyo Kuleylinta?**

Nuqul biilashaadii u dambeeyay iyo/ama rasiidhadii shidaalka ah noo soo raaci codsigan.

| | **Kuleylilnta Guud** | **Kuleylinta Kale** | **Koronto** | **Tamarta Cadceedda** |
|---|---|---|---|---|
| **Magaca Shirkada** | | | | |
| **Shidaal Nooca:** | ○ **Gaasta Dabiiciga ah** ○ **Borobayn** ○ **Saliid** ○ **Shidaalka noolaha** ○ **Uumi** | ○ **Gaasta Dabiiciga ah** ○ **Borobayn** ○ **Saliid** ○ **Shidaalka noolaha** ○ **Uumi** | ☐ **Isha Kuleylilnta guud waa koronto** | |
| **Lambarka Xisaabta:** | | | | |
| **Magaca Xisaabta Ku Qoran:** | | | | |

**Miyaad kuleylinta u adeegsata alwaax ama shiidaal dabiici?**

| Waa noocee shiidaalka dabiiciga ee aad isticmaasho? - ○ Xaabo ○ Qurubo○ Galley ○ Wax Kale _______________ | Boqolkiiba kuleylintaada intee ayay tani soo saartaa? %_______________ | Immisa qol hurdo ayuu gurigaaga ka kooban yahay? | Ma adigaa keensada xaabadaada/galleyda ada? ○ Haa ○ Maya |
|---|---|---|---|

**Siddee ayaad jeclaan lahayd in dheefahaaga loo bixiyo?**

Haddii aan si kale loogu sheegin hoos, dheefahaaga waxaa loo kala qaybiyaa shirkaddaada koobaad ee kuleyliyaha (70%) iyo korontada (30%).

__50% la siinayo kuleylliyaha koobaad iyo 50% korontada __100% la siinayo kuleylliyaha koobaad __100% la siinayo korontada

__Mid kale:__________________

---

**Gargaarka Degdegga ah Tamarta**

Haddii aad hadda wajahayso xaalad degdeg ah, ka dooro nooca xaaladda hoos oo noo soo dir nuqul ogeysiiska ah:

☐ Horey looga jaray. Shirkadda:____________________ Taariikhda la jaray:____________

☐ Helay ogeysiiska jarista. Shirkadda:____________________ Taariikhda la qorsheeyay:

☐ Taangiga shidaalka oo maran (ama ay ku jiraan wax ka yar 20%) oo ay la socoto lacagta iyo keenista. Waa maxay % ee ku jiraa taangigaaga manta____________ cabirka taangiga _________.

La xiriir shirkadaada tamarta si aad u dejisaan qorshaha aad lacagta ku bixineyso.

**Qaybta 5. Ogolanashaha iyo saxiixa Oktoobar 1, 2025 illaa Sibteembar 30, 2026**

1 Waxaan shirkadahayga adeegyada kuleylinta iyo korontada ogolaansho u siiyay inay xogta xisaabtayda iyo isticmaalkayga korontada siiyaan Waaxda Ganacsiga ee Minisoota (Ganacsiga) iyo Qandaraaslayaasha Ganacsiga si loogu adeegsado Barnaamijka Taageerada Tamarta (EAP), Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP) iyo Barnaamijka Horumarinta Tamar-tashiilka.

2 Waxaan u ogolaaday Maamulka Amniga Bulshada, Waaxda Adeegyada Aadamaha ee Minnesota iyo wakaaladaha la xulafada ah, iyo Waaxda Shaqaaleynta iyo Horumarinta Ganacsiga ee Minnesota inay xogtayda khuseysa Lambarka Amniga Bulshada, gunnooyinka dadwaynaha ee aan helo, iyo dakhligayga sannadkii u dambeeyay si Ganacsiga iyo qandaraaslayaasha Ganacsigu ugu adeegsadaan EAP, WAP, iyo CIP.

3 Waxaan u oggolaaday Ganacsiga (Commerce) inay macluumaadka iyo codsiga ku saabsan u qalmitaankayga EAP la wadaagto barnaamijyada tamarta Commerce ee kale ee laga yaabo inaan u qalmo, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, Xeerka Yareynta Sicir-bararka Lacag-celinta Tamarta Guriga, Lacag-celinta Bamka Kulayliyaha ee Minnesota, Deeqaha Sanduuqa Korontada ee Minnesota.

4 Waxaan EAP, WAP, iyo CIP-da Minnesota u ogolaaday inay:

- La xiriiraan cidda aan u shaqeeyo si ay u xaqiijiyaan dakhligeyga.
- La xiriiraan mulkiilaha guriga aan ku jiro si u xaqiijiyaan Meesha aan deganahay iyo/ama isha aan kuleylka ka helo haddii aan kireyste ahay.

5 Waxaan Adeeg Bixiyayaashayda EAP, WAP, iyo CIP u ogolaaday inay igala soo xiriiraan wixii xiriir dheeraada iyo sii gudbin ah.

6 Markaan saxiixo, waxaan qirayaa in dhammaan xogta codsigan ku jirta ay sax tahay. Waxaan sidoo kale qirayaa in:

- Aan haddda deganahay cinwaanka ku qoran codsigan.
- Aan saxiixayo codsiga aniga oo metalaya dhammaan xubnaha qoyskayga.
- Ay dhici karto in la iga dalbado inaan caddeeyo bayaanadeyda.
- Ay dhici karto in si waafaqsan shuruucda federaalka ama gobolka la igu soo oogo dambi madani ah ama mid maxkamadeed haddii aniga oo og aan macluumaad been ah ama been-abuur ah sameeyo.
- Waxaan leeyahay xuquuqaha ku jira EAP, WAP, iyo CIP. Waxaan helay nuqul "Ogeysiiska Asturnaanta iyo Xuquuqaha iyo Masuuliyada ah" oo waan aqbalay shuruudihiisa iyo sharciyadiisaba.
- Rafcaan ayaan ka qaadan karaa go'aamada Bixiyaha Adeegga Taageerada Tamareed ee ku saabsan gunnooyinkayga.
- Waan fahamsanahay in macluumaadka maqani uu daahin karo go'aaminta inaan u qalmo kaalmo.
- Waan fahahmsanahay in Adeeg Bixiyahaygu uu awoodi karo inuu iga caawiyo bixinta kharashka tamarta ee muddo dhaafay iyo/ama inuu ila sameeyo qorshe aan lacagta ku siiyo shirkadaha tamarta.
- Waan fahamsanahay in buuxinta codsigani aanay dammaanad qaadeyn in qoyskaygu heli doono taageero.
- Waxaan ahay qof weyn, qof yar oo masuul ah, ama qof yar oo madaxii qoyska ah oo aan la nooleyn wax dad waaweyn ama qof yar masuula ah.

**Magaca Daabacan: :**____________________________.

**Saxiixa:** ____________________ **Taariikhda Maanta:**____________.

**Dhammaan codsiyada waa in boosta la soo dhigaa ama EAP ay helaan May 31, 2026 ama ka hor.**

**Codsigaaga waa in boosta lagu soo dhigaa muddo 60 beri gudahooda oo ka bilaabmeysa taariikhda aad saxiixday.**

**Hore u codso, lacagtu way dhammaan kartaa.**

# Ogeysiiska Asturnaanta iyo Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga.

## Ogeysiiska Asturnaanta

**Qodobada Xeerka Asturnaanta** Shuruucda federaalka iyo kuwa gobolka ayaa naga raba inaanu kuu sheegno xuquuqdaaada iyo masuuliyadahaaga ka hor intaanan ka uruurin macluumaad loo aqoonsaday inay khaas ama sir yihiin. Foomkani wuxu ku siinayaa macluumaad u hogaansan Xeerka Asturnaanta ee Federaalka ee 1974 1974, 5 U.S.C. § 552a(e)(3) iyo Xeerka Dhaqamada Xogta Dawladda ee Minnesota, Minn. Stat. § 13.04, subd. 2 (oo sidoo kale loo yaqaan digniinta Tennessen).

Fadlan si taxaddar leh u akhri *Ogeysiiskan Asturnaanta* ka hor intaadan buuxin oo saxeexin *Codsiga Barnaamijka Tamarta ee Minnesota*, oo *Ogeysiiskan Asturnaanta* keydso si aad mustaqbalka u isticmaashid. Ogeysiiskan Asturnaanta wuxu ku dabbaqmayaa Barmaajika Taageerada Tamarta (EAP), Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP), iyo Barmaajika Kor-u-qaadista Tashiilka (CIP), oo sidoo kale loo yaqaan Barnaamijyada Tamarta.

**Waa maxay sababta aanu codsiga macluumaad ugu uruurino?**

Waxaanu macluumaadkaaga u adeegsan doonaa inaanu ku baarno, ku qiimeyno oo ku maamulno Barnaamijyada Tamarta. Macluumaadka waxaanu ugu baahanahay:

- Inaanu dadka kale kaaga aqoonsanno.
- Inaanu ku ogaano inaad kaalmo u qalanto.
- Inuu noo sahlo inaanu kaalmadaada u helno lacago federaal ama gobol.
- Si aanu u buuxino shuruudaha warbixinta gobolka ama federaalka.

**Ma kugu waajibaa inaad na siiso macluumaadka?**

Waxaad xaq u leedahay in aadan na siin macluumaadka aanu ku waydiino.

**Maxaa dhacayaa haddii aad macluumaad na siiso ama na siin waydo?**

Haddii aad na siiso macluumaadka lagu dhex codsaday codsiga, codsigaaga waa laga shaqeyn doonaa. Haddii aad na siin weydo macluumaadkaas:

- Codsigaaga lagama shaqeyn doono.
- Waxa laga yaabaa inaadan helin adeegyada.
- Waxa laga yaabaa inaadan heli kaalmada kharashka tamarta.
- Waxa laga yaabaa in adeegyadaadu dib u dhacaan.

Waanu hayn doonaa macluumaad kasta oo aad na siiso, codsiga haddii la aqbalo iyo haddii aan la aqbalinba.

**Yaa laga yaabaa inay arkaan codsigan?**

Dadkan soo socda ayaa laga yaabaa inay helaan macluumaadka ku jira codsigaaga Barnaamijyada Tamarta haddii: (i) ay u baahdaan inay helaan macluudka codsiga si ay u qabtaan shaqadooda la xiriirta Barnaamijyada tamarta (EAP, WAP, iyo CIP), ama (ii) uu si kale sharciga federaalka ama gobolku awood ugu siiyay inay arkaan, ama (iii) ay macluumaadka u adeegsanayaan ujeedooyin warbixaneed, cabbirista natiijooyinka, sii gubin ama u qalmiseed.

- Bixiyayaasha Adeega Barnaamijyada Tamarta ee Maxalliga ah oo ku shaqeynaya qandaraaska ay kula jiraan Waaxda Ganacsiga ee Minnesota (Ganacsiga).
- Qaybta Deeqaha ee Adeegyada Bulshada Minnesota iyo Bixiyayaasha Adeegyada Deeqaha Bulshada ee Minnesota oo ku shaqeynaya qandaraaska ay kula jiraan Ganacsiga.
- Hanti-dhowrayaasha barnaamijka si waafaqsan hagitaanka Xafiiska Maamulka iyo Miisaaniyadda (OMB).
- Waaxda Maamulka ee Minnesota, Ganacsiga, Waaxda Shaqaaleysiinta iyo Koboca Dhaqaalaha, Caafimaadka, Wakaaladda Maalgelinta Guriyaynta, Adeegyada Aadamaha, Adeegyada Dakhliga iyo MN.IT.
- Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha iyo Tamarta ee Maraykanka.
- Guddidda Adeega Bulshada ee Minnesota.
- Kormeeraha Sharciga ee Minnesota.
- Shaqsiyaadka loogu ogolaaday si waafaqsan amar maxkamadeed.
- Shirkadaha tamarta si ay u ogaadaan awoodida, Barnaamijyada Tamarta, ama Barnaamijyada kale ee ay amartay PUC, kadib oggolaanshaha Commerce.Iskaashiga Bulshada Minnesota (Minnesota Community Action Partnership).
- Maamulka Amniga Bulshada ee Maraykanka.
- Wakaaladaha ama hay'daha kale ee sharciga federaalka ama gobolku u ogol yahay.

**Maxaan u uruurinaa Lambarada Amniga Bulshada?**

Waxaanu Lambarada Amniga Bulshada u adeegsanaa maamulka Barnaamijyada Tamarta (EAP, WAP, iyo CIP) si aanu u hubino in codsadayaasha iyo xubnaha qoyskoodu ay helaan keliya gunnooyinka la ogol yahay. Sharciga federaalka ayaa noo ogol inaan kaa dalbano inaad sheegto Lambarkaaga Amniga Bulshada si aanu uga shaqeyno codsigaaga oo aanu uga hortagno, una saxno been abuurka iyo si xun u adeegsiga. OGOLAANSHAHA: Qaybta 205(c)(2)(C)(i) ee Xeerka Amniga Bulshada, 42 U.S.C. § 405(c)(2)(C)(i). Dhammaan codsadayaasha (marka laga reebo ajaanibka u qalma) waxa laga rabaa inay bixiyaan Lambarka Amniga Bulshada oo la xaqiijin karo si looga shaqeeyo codsigooda.

**Maxaan u waydiinaa macluumaad ku saabsan jinsigaaga?**

Kani waa macluumaad ikhtiyaari ah. Waxa loo qoraa loona kaydiyaa ujeedooyin tiro-koob oo keliya dartood. Barnaamijku cidna kuma faquuqi karo sabab jinsi, qawmiyadda laga soo jeedo, diin, sinji, fikir galmo, ama xulafo siyaasadeed.

# Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga

**Waxaad xuquuqo gaar ah u leedahay inaad kaalmo hesho:**

Waxaad xaq u leedahay:

- Inaad markale soo codsato haddii lagu diido.
- Inaad kaalmo dheeraad ah codsato haddii aad u baahan tahay.
- Inaad ogaato shuruucda iyo sidaanu u go'aamino cidda kaalmada helaysa.
- Inaad jawaab ku hesho waqti macquul ah ka dib markaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka.
- Inaad rafcaan ku qaadato muddo 30 beri gudahood ka dib marka laguu soo diro natiijada codsigaaga haddii:
    - Aad hesho warqad diidmo ah oo aad u maleynayso inaanu isticmaalnay macluumaad khaldan si aanu go'aanka u gaarno.
    - Aadan heli kaalmadii laguu ballan-qaaday.

**Waxaad leedahay masuuliyadahan:**

Waa inaad noo sheegtaa haddii aad adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi:

- Helay kaalmo biilasha tamarta ah jiilaalka qaybtiisii hore.
- Uu u guuray ciwnaan cusub (noogu sheeg 30 beri gudahood oo guurista ka bilaabantay)
- Aad bedeshay cidda shidaalka ama gaasta kuu keenta ama shirkadda korantada.

**Waxa laga yaabaa in barnaamijkani bixiyo keliya qayb biilashaada kuleylinta iyo korontada ah. Adiga ayaa ka masuul ah inaad bixiso haraaga.**

**Ka warran haddii aad fileyso in macluumaadka galkaaga ku jiraa uu khaldan yahay?**

Kala hadal Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah waxa aad u maleynayso inuu ka khaldan yahay galkaaga.

**Maxaa dhacaya haddii aad bixiso macluumaad khaldan?**

Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah ama Waaxda Ganacsiga ee Minisoota waxay eegi karaan oo hubin karaan macluumaad kasta oo ku jira codsigaaga ama si kale lagu baxshay. Gunnooyinka Barnaamijka Tamarta waa laguu diidi karaa haddii aad bixiso macluumaad kala dhiman ama been ah. Waxa dhici karta in si waafaqsan shuruucda federaalka ama gobolka laguugu soo oogo dambi madani ah ama mid maxkamadeed haddii adiga oo og aad macluumaad been ah ama been-abuur ah soo raaciso codsigaaga.

**Sida cabasho loo soo gudbiyo:**

Haddii aad u maleynayso in lacagbixintaada tamartu aanay ahayn sidii laga rabay ama aadan helin adeegyadii aad filaysay inaad hesho, waxaad la xiriiri kartaa Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah ee ku qoran codsiga. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabtooda, waxaad warqad rafcaan ah u qori kartaa Adeeg Bixiyaha EAP ee maxalliga ah. Kaydso cinwaankooda iyo lambarka taleefankooda.

Haddii aadan ku qanacsanay jawaabtooda rafcaankaaga, warqad u qor:

Sarkaalka Rafcaanada
Barnaamijka Kaalmada Tamarta
Waaxda Ganacsiga ee Minisoota
85 East 7th Place, Suite 280
St. Paul, MN 55101-2198

Haddii si dadka kale ka duwan laguula dhaqmay sababo midabkaaga, jinsigaaga, dhalshadaada asalka ah, diintaada, sinjigaaga, da'daada, xaalkaaga guur, siyaasadaha aad rumaysan tahay, naafonimadaada jireed ama maskaxeed daraadeed, warqad u qor kuwan soo socda midkood:

Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota
Grigg's Midway Building
540 Fairview Ave. N, Suite 201
St. Paul, MN 55104
https://mn.gov/mdhr/

-AMA-

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamaha ee Maraykanka
Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah, Gobol V
233 North Michigan Avenue, Suite 1300
Chicago, IL 60601
www.hhs.gov/ocr/civilrights/complaints